

MAGAALADA SAINT PAUL  
WAQTI JIRRO IYO NABADGELYO LA KASBADAY (ESST)  
**OGEYSIIS KU SOCDA SHAQAALAHA**

*Warqaddan waa in lagu soo bandhigaa meel waadix ah oo la arki karo, oo waa in lagu helo luqado badan*

## Loo-shaqeeyayaasha Saint Paul waa inay siiyaan shaqaalaha ka shaqaynaya Saint Paul fasax mushahar leh ee sababo caafimaad ama nabadgelyo.

**Waqti Jirro:** Cudur maskax aahaaneed ama jidh ahaan ee shaqaale ama xubin qoyska ka tirsan, oo ay ku jirto daryeelka caafimaad ee kahortaggu.

**Waqti Nabadgelyo:** Sababo la xidhiidha rabashado qoys, faraxumayn galmo, dabagal, xidhitaanada dugsi oo ay sabab u tahay cimilada oo xumaatay ama arrimo kale oo nabadgelyo guud ah, ee shaqaale ama xubin ka mida qoyska shaqaalaha.

Waxaad u isticmaali kartaa ESST daryeel shaqaaluhu leeyahay ama daryeelka xubin qoyska ka mida.

### Heerarka iyo Icticmaalka Waqtiga Jirro ama Nabadgelyo la Kasbaday:

- Shaqaaluhu waxa uu helaa 1 saac oo ah ESST 30-kii saacadoodba ee uu ka shaqeeyo Saint Paul
- Shaqaaluhu waxa uu heli karaa ilaa 48 saacadood sannadkiiba oo wuu kaydsan karaa waqtiga aanu isticmaalin
- Shaqaaluhu waxa uu qaadan karaa in ka badan ilaa 80 saacadood oo ah saacadaha aanu isticmaalin ee ESST sannadkiiba
- Shaqaaluhu waxa uu bilaabayaa helista fasaxa jirrada maalinta 1aad ee shaqada
- Shaqaaluhu waxay bilaabi karaan isticmaalidda ESST 90 maalmood kadib shaqada
- Shaqaaluhu waa inay ka shaqeeyaan 80 saacadood Saint Paul si ay ugu qalmaan

## LOO-SHAQEYAYAASHU WAA INAY BIXIYAAN ESST. AARGOOSIGU WAA SHARCI DARO

Haddii aad aaminsantahay xaqa aad u lahayd ESST in lagu xadgudbay, waxad xerayn kartaa dacwad:

**651-266-8900 | [laborstandards@stpaul.gov](mailto:laborstandards@stpaul.gov) | [www.stpaul.gov/esst](http://www.stpaul.gov/esst)**

Waxa dheer, haddii lagaa aargoostay, waxaad u gudbin kartaa dacwad maxkamadda.

Fasiraad luqadda ah, turjumaad, iyo fahamyo ayaa la heli karaa.

Kala hadal loo-shaqeeyahaaga ESST. Loo-shaqeeyahaagu waxa laga yaabaa inuu hore u buuxiyey shuruudaha sharci. Loo-shaqeeyahaagu waa inuu ku siiyo baaqigaaga ESST.

# ESST

### Magaalada Saint Paul (City of Saint Paul)

Waaxda Xuquuqa Aadanaha & Fursadda Dhaqaale ee loo Simanyahay  
(Department of Human Rights & Equal Economic Opportunity)

Qaybta Heerarka Shaqaalaha (Labor Standards Unit)

15 W Kellogg Blvd, Suite 280, Saint Paul, MN 55102  
651.266.8900 | [laborstandards@stpaul.gov](mailto:laborstandards@stpaul.gov)

**Wax badan ka baro [www.stpaul.gov/esst](http://www.stpaul.gov/esst)**

